

Siyaasadaha Tababaradda ee Think Small/Child Care Aware of Minnesota

Qorshaha Caafimaadka iyo Badbaadada ee COVID-19 iyo Siyaasadaha Tababaradda

Habraacyadaan waxaa loogu talagalay in lagu ilaaliyo badbaada shaqaalaha ilmaha da' yarta, kuwaas oo ay ka mid yihiin tababarayaasha, macalimiinta, iyo shaqaalaha Think Small/Child Care Aware ee Minnesota.

Ka qaybgalayaasha muujinaya calaamadaha cudurada faafa (oo uu ku jiro COVID-19) waa in aysan tababarka soo xaadirin. Lacag celinta iyo/ama caawinaad dhan u badalashada tababar kale waxaa la bixinayaa marka Think Small lasoo ogeysiyo xanuunka tababarka ka hor. La xiriir pdsupport@thinksmall.org ama wac (651)-641-3549.

- [Raws li CDC cov lus qhia tam sim no \(txog rau lub March 2024\)](#), Thov nyob hauv tsev thiab nyob kom deb ntawm lwm tus neeg yog tias koj muaj tus kab mob ua pa nyuab, suav nrog rau tus kab mob COVID-19 tibs. Tom qab 24 teev uas koj tus mob zoo (xws li hais tias koj tsis kub to haub thiab tsis ua npaws) thiab tsis noj tshuaj ntxiv lawm, koj mam li rov qab tuaj koom peb ntawm cov hoob cob qhia dua. Yog tias koj rov qab tuaj koom kev cov qhia dua ntawm thawj 5 hnuv, thov nco ntsoov xav txog kev ceev faj ntxiv xws li kev tu cev kom hu thiab ntxuav tes kom zoo, npog ntsej muag thiab xyaum nyob deb ntawm lwm tus neeg.
- Waxaa dhammaan dadka 12 sano jirka ah iyo ka weyn lagu dhiiri galinayaa in ay COVID-19 iska tallaalaan inta aysan tababarka soo xaadirin si ay iyaga iyo dadka kale ee aan is tallaali karin u badbaadiyaan.
- Maaskayaasha qasab kuma aha ka qaybgalayaasha iyo tababarayaasha xilliga tababarka socdo.

Siyaasadaheena waxay ka turjumayaan [Tallooyinka iyo Tilmaamaha CDC ee xaadirkan](#).

Diwaangelinta iyo Lacag Bixinta

- Waxaa shardi ah in qofku ku leeyahay akaawnd Develop si uu isu diwaageliyo. Ka samayso Develop akaawnd si aad isugu qortid tababarada, gal www.DevelopToolMN.org.
- Diiwaangelinta tababarada waxaad ka heli wesidka Develop onlinka ah.
- Caawimaad xaga Develop waxaad ka heli Think Small emailkaan pdsupport@thinksmall.org, ama soo wac (651) 641-3549.
- Diiwaangelinto waxaa la aqbali doonaa ilaa 7 bari tababarka kohor.

- Isdiwaangelin hore baa loo baahanyahay. Iska soo galid lama ogola.
- Ilmaha 13 sano iyo inta ka wayn baa la ogolyahay kaliya in ay qaataan tababarada haddi lacag lagu diiwaangaliyo.
- Hooyooyinka naas nuujiya oo ilmahoodo naas kaliya ka qaato nafaqo, way u soo wadan karaan ilmahooda ay naas nuujinayaan (wixi kayar 7 bilood) tababarada ka baxaya Think Small ama goobaha kale. Haddi ilmuhu oo buuq tababarka uu u keeno, hooyada waxaa laga codsanayaa in ay ilmaha ula baxdo kalaaska bannankiisa. Shuruudaha kale ee imaanshaha way sii socon doonaan in la raaco.

Baajinta ama Kansalaada

- **Diiwaangalinto waa kama dambeys, ka qaybgalayaasha lama siinayo lacag celin, ama in tababar kale loo badalo, taasoo laga reebayo qofka u soo sheega Think Small xanuun kudhacay tababarka kohor**
- Waxaa dhici kara in Child Care Aware of Minnesota/ Think Small ay baajiyaan tababarada sababo kala duwan awgood. Haddi baajin dhacdo, ka qaybgalayaasha sida ugu dhaqsaha badan baa loola socodsiinayaa, lacag celina waa la siinaya.
- Wixii baajin ah ee kutaxaluqa cimilada ama hawada waxaa la go'aaminayaa ugu dambeyn 2:00 duhurnimo ee tababaradda maalmaha isbuuca. Tababarada baxaya Sabtida, go'aanka waxa lagaaraya 2:00 duhurnimo malinata ka horaysa. Shaqaalaha Child Care Aware ama Think Small of Minnesota ayaa la socodsiinaya ka qaybgalayaasha taleefoon ahaan ama email ahaan. Baajinta sidoo kale waxaa laga cusboonaysiinaya codka duuban ee taleefoonka (651-641-3549) iyo websaydka (www.thinksmall.org).

Ka Qaybqaadashada Tababaradda

- Tababarka waxuu ku bilaabmayaa kuna dhamaanayaa waqtigii loogu talagalay. Ka qaybgalayaasha tababarka ka soo daaha 15 daqiiqo ama ka badan, ama aan raacin habka tababarku ku socdo MA HELAYAAN buundada/dhibcaha tababarka.
- Tababaraha kalaaskaaga wuxuu qorayaa imaanshaha. Imaanshaha kalaasyada baxaya dhowr maalmood waxaa diiwaangalinaya tababaraha maalin kasta. Si ka qaybgaluhu uu helo dhibcaha tababarka waa in uu ka qayb qaato maalin walba, buundooyinka qayb ka mid ah lama bixinayo haddi tababarku socdo dhowr maalmood.
- Taleefoonka gacanta waa in codka laga xiro oo meel la dhigo haddi aysan jirin arin kadis ah. Dhibcaha tababarka waa laga ceshanayaa qofkii aad u isticmaala taleefoonka, ama ka maqnaada kalaaska, taas oo tababaruhu go'aan ka gaarayo.
- Kalaaska ka qaybgalayaasha waa loo furayaa 15 daqiiqo bilowga tababarka kahor.
- Imaanshaha iyo cadaynta tababarada waxa laga heli karaa www.DevelopToolMN.org markii aad gashid akaawanka aad ku leedahay Develop, waad fiirin kartaa ama daabacan kartaa inta tababar aad qaadatay. Shahaadooyin warqad ah ma bixino.
- Imaanshaha waxaa laga cusboonaysiiya Develop shan bari tababarka kadib. Adaa ka mas'uul ah in aad magacaaga diiwaangalisid marka aad ku jirtid kalaaska.
- Haynta/daryeelka carruurta ma bixino. caruur lama ogola in ay yimaadan kuwa diiwaangashan oo kawayn 13 sano ma ahee. Fadlan raadso meel aad caruurta sii gaysato si aad si fiican uga qaybqaadato waxbarashada.

- Soo qaado qalabyada ku haboon waxa aad baranaysid (waraaqo, qalimo, ama kombuyuutar ama tablet).
- Koorsooyinka qaar waxaa la socda faahfaahin qoraal oo hagaya ka qaybgalayaasha. Taas waxaa lagu tilmaamayaa markii aad isdiiwaangalineyso iyo email-ka xasuusinta tababarka ee lagu soo dirayo. Ka qaybgalayaasha ayaa ka mas'uul ah in ay tababarka la yimaadaan koobi qoraalkaas. Si aad u heshid hagayaashan, fadlan booqo <https://www.mncpd.org/resources/#tab-id-6>. Hagayaasha waxay ku hoos jiraan koorsooyinka magacyadooda ee hoos yimaada batanka "DHS Participation Guides".
- Shaqaalaha Think Small /Child Care Aware, tababarayaasha, iyo qaybgalayaasha tababarka waa in ay raacaan tilmaamaha NAEYC ee xeerka anshaxa wanaagsan: <https://www.naeyc.org/files/naeyc/file/positions/PSETH05.pdf>

Turjumaanada

- Markii la codsado, Think Small waxay bixin karaan turjumaan lacag la'an ah. Fadlan la soo xiriir pdsupport@thinksmall.org ama (651) 641-3549 si aad u codsatid turjumaan ama aad noo soo ogeysiisid in aad la imaanaysid turjumaan kuu gaar ah sida ugu dhakhsaha badan ama 7 bari tababarka ka hor.
- Waxaan isku dayi doonaa in aan buuxino dhamman codsiyada la xiriira turjumaanka. Haddi turjumaan la waayo, waxaan ka qaybgalayaasha ka caawin doonaa in loo helo tababaro kale.
- Haddi ka qaybgaluhu doorbidayo in uu keensado turjumaan uu gaar ah, turjumaankaas waa in uu yahay 18 sanno jir ama kawayn.

Sharciga Naafada Mareykanka (ADA)

- Child Care of Minnesota/Think Small waxay u hoggaansami doonaan dhammaan sharciyada federaalka/qaranka iyo kuwa gobolka ee quseeya taageerada dadka naafada ah una dhaqmi doonaan si wafaaqsan xeerarka iyo hagitaanka Sharciga Naafada Mareykanka (ADA).
- Marka laga codsado, Think Small waxay baraha siineysaa [Foom-ka Codsiga Qaabillaada Naafanimada ee Sharciga ADA](#). Foom-ka Qaabillaada waa in la helaa todoba maalmood ka hor kulanka tababarka. Haddii codsiyada si macquul ah loo aqbali karo iyagoo abuurayn wax culees ah ama sababeyn khatar dhanka badqabka goobta shaqada, adeegyada waa la bixin doonaa. Shaqaalaha Think Small waxay shaqsig/qofka kala shaqeenayaan waxii qaabilaaddo macquul ah. Qofka waxuu jawaab ku heleyaaa muddo 48 saacaddood ka hor kulanka tababarka.
- Listiga soo socda waa qaabilaaddaha la bixinayo, laakiin kuma eka:
 - Is beddelo lagu sameeyo deegaanka/goobta waxaana ku jiri kara agabyo si diyaar ah u heli karaan una isticmaali karaan dadka naafada ah, helidda iyo wax ka bedelka qalab, hagaajin ku haboon ama wax ka beddelka imtixaannada, agabka tababarka iyo siyaasaddaha, bixinta aqriyayaal iyo turjumaanno xirfadlayaal ah, iyo qaabilaaddaha kale ee la midka ah ee loogu talagalay dadka naafada ah.
 - Wax ka bedelka loogu talagalay dadka naafada ka ah dhanka xiriirka/iskaarsiinta (dadka indhoole, Dhagoole, Dhagoole/Indhoole) [Siyaasaddaha ADA](#).
 - Xayawaanka u adeega dadka naafada ah waa in ay raacaan [Siyaasadda ADA](#).

La xiriir Child Care Aware of Minnesota Qaybta Horumarinta Xirfadeed (Professional Development)

La soo xiriir [ururka Child Care Aware](#) ee deegaankaga:

Tababarada fool ka fool ka ah: Think Small: pdsupport@thinksmall.org or (651) 641-3549

Tababarada online-ka ah: pdsupport@thinksmall.org or (651) 641-3549

Eager-to-Learn: etlsupport@childcareawaremn.org or (651) 335-6658